



Cunfiga xigtada

Taageero loogu tala galay
cunfigaystaha



TANUMS
KOMMUN

Nala soo xiriir si aad taagero u hesho

Weligaa ma xakamayn waysay caradaada ama waxyeello ma u gaysatay qof xigto kuu ah? Haddii aad deggantahay degmada Tanum waxaad heli kartaa talo iyo taageero adigoo Guriga Kulanka kula hadlaya tiimka khayraadka- iyo daweynta ee sooshaalka.

Wuxuu sooshaalku ku siinayaa taageero adigaaga buuxiyay 18 sano ee ay ku adagtahay in uu maareeyo dareenkiisa, tusaale ahaan carada ama isticmaalay nooc ka mid ah cunfiga xigtada ama ka baqaya in aad dhaawacdo qof ah xigtadaada, ama

- marka aan xanaaqo waxaa dhacda inaan kor u qaado codkayga, qayliyo, aanna dhaho waxyaabo xunxun
- lammaanahayga (iyo laga yaabee carruurtu) mararka qaar way iga baqaan oo waxay dareemaan raaxo darro
- waa ay dhacdaa inaan masayro oo aan koontaroolo lamaanahayga, anigoo farriin qoraal ah taleefanka ugu dir-diraya/wac-wacaya in badan, ka faalloonaya xaaxibbayaasheeda ama muuqaalka ama doorashada dharka.
- Waan ku hanjabay inaan waxyeelleeyo naftayda ama lammaanahayga

Haddii aad isku taqaannid wax ka mid ah waxyaabahan kor ku xusan, kala xiriir sooshaalka teleefanka 0525-180 00.

Waxaad agteenna ka heli kartaa

- Talo iyo taageero
- Wadahadal ku saabsan cunfiga
- In lagaa caawiyo la xiriiridda hey'adaha caafimaadka iyo hey'adaha kale ee dowladda
- Caawimaad ku aaddan inaad aragtid baahida carruurta, haddii ay carruuri meesha jirto
- Fursad ku aaddan ka hadlidda arrimaha daryeelka iyo waqti la qaadashada carruurta
- Caawimaad ku aaddan xiriirrada qeybaha kale ee sooshaalka ka tirsan

Waxaa jirta caawimaad dheeri ah oo la heli karo

Dooro inaad joojiso

Telefoon 020-555 666
www.valjattsluta.se

Xarunta ragga

www.manscentrum.se

Heeganka ragga ee Qaranka

Telefoon 08-30 30 20
www.mansjouren.se



Haddii ay carruuri jirto qoyska gudihiisa

Haddi ay carruuri meesha ku jirto waxay waaxda carruurta iyo dhallinyarada ee degmadu u baahantahay in ay baarto xaaladda ilmaha si ay u qiimeyso baahida uu ilmuhu u qabo taageero.

Waxaa na saaran waajib sir qarín

Dhammaan shaqaalaha sooshaalka waxaa saaran waajib sir qarín, caawimaduna waa lacag la'aan.

Ha ka labalabeyn inaad nala soo xiriirto!

Wixii dheeri ah ka akhriso
www.tanum.se

XIRIIR

Sooshaalka tel. 0525-180 00.
Teleefanka waa la ag joogaa waqtiyada xafiiska, isniin-jimco 8:00-16:30.

Haddii aad caawimaad u baahantahay waqtiyada xafiiska ka dib, heeganka sooshaalka kala xiriir nambarka taleefanka ee: 0522-69 74 44 waqtiyada hoos ku qoran
Isniin-khamiis, 16:30-23:00
jimco, 15:30-02:00
sabti, 16:00-02:00
axad, 16:00-23:00

Waqtiyada kale waxaa heeganka sooshaalka lala xiriiri karaa iyadoo booliska la soo marayo - wac 112

Haddii ay xaaladdu degdeg tahay, wac mar walba 112!

**Taageero ka socota
ururro iyo jaaliyado**

Dooro inaad joojiso
Telefoon: 020-555 666

www.valjattsluta.se

Xarunta ragga
www.manscentrum.se

Heeganka ragga ee Qaranka
Telefoon: 08-30 30 20
www.mansjouren.se

**Haddii ay
xaalado degdeg
ah jiraan,
boolska ka wac
mar walba: 112**



Tanums Kommun

Cinwaanka booqashada Apoteksvägen 6
Cinwaanka boostada 457 81 Tanumshede
Telefoon 0525-180 00
kommun@tanum.se
www.tanum.se



**TANUMS
KOMMUN**